Jeermiska Cudurka

Qaaxada

Developed by the
Minnesota Department of Health,
Tuberculosis Prevention and Control Program
August 2002 phone: (612) 676-5414

This is one in a series of four patient education pamphlets that addresses TB to be used in various clinical situations.

Medicine for Tuberculosis Infection, Somali

Jeermiska Cudurka Qaaxada

Takhtarkaagu markuu go'aansado in aad qabto jeermiska cudurka qaaxada keena. Waxaa lagula talin in aad qaadato daawada ka hortaga jeermis cudurka qaaxada ee kobcaya.

Daawadu waxay ka hortagi kartaa koboca jeermiska qaaxada.

Waqti hore ayaa waxaad neefsatay (oo aad qaaday) jeermiska qaaxada oo haleelay sambabadaada. Jirkaagu waxaa ku jiray oo ku fidey jeermiska qaaxada ama waad la bukootay. Jeermiska waxaa uu ku jiraa jirka asagoo wax falgal ah lahayn, Sidoo kale wali waa uu ku dhex nool yahay jirkaaga asaga oo wax xanuuna kuu keenin. Mana aad qaadsiin kartid cid kale. Taa ayaa waxaa loo yaqaan **Jeermiska Cudurka Qaaxada**.

Haddii aadan qaadan daawada, waad la bukoon jeermiska cudurka qaaxada keena. Dabadeedna Jermiska qaaxada ayaa wuxuu ku fidi karaa dadka kale. Daawadu waxaay ka hortagaysaa koboca jeermiska qaaxada ayada oo dilaysa jeermiska. Daawada waxaa lagu magacaabaa Daawada ka hortaga cudurka.

Daawadaada u qaadao sidii uu takhtarka kuugu qoray.

Daawada ka hortaga

Isoniazid (INH) waa daawada ka hortagga laguugu qoray. Waxaa ay dilaysaa jeermiska qaaxada ee jirkaaga ku jira. Daawada **INH waa in loo qaataa sida uu takhtarka kuugu qoray**, haddii kale ma noqonayso mid ka hortagtaa jeermiska qaaxada.

Takhtarkaagu waxaa uu u baahana yahay in bishiiba mar uu ku arkaa inta daawada ka hortagga ay kuu socoto si uu u hubsado in jirkaagu daawada qaadan karayo.

Waxaa laga yaabaa in daawada INH ka kuu keento xanuuno. Waa in aad sida ugu dhaqsa badan u wacdaa ama aad aragtaa takhtarkaaga haddii aad isku aragto wax kamid ah calaamadahaan:

- labo labo
- matag (hunqaaco)
- cunno xumo
- daal aan caadi ahayn
- calool xanuun
- midabka kaadida oo isbadala
- midabka indhaha iyo jirka oo hurdi (jaale) noqda
- qandho ku haysa saddex maalmood iyo wax ka badan
- gacmaha iyo cagaha oo aad ka jiriiricooto
- jirka oo furuurac kaa soo yaaca

Cabitaanka (qamriga iyo biirta) waxay ay kordhiyaan waxyeelada daawada (side effect) inta aadan qaadanaysid daawada INH. La xiriir takhtarkaaga haddii aad warbixin dheeriya u baahan tahay.